

## Ingiriiska oo ah luqad siyaada ah ahaan (EAL): Macluumaadka waalidiinta iyo daryeelayaasha

Dhamaan dugsiyada Xukuumada ee ku yaal Fiktooriya waxay dhigaan Manhajka Fiktooriya F-10. Manhajku wuxuu soo qadimaa waxa ay tahay in ilma walbaa barto Asaaska ilaa sanadka 10aad.

Manhajka Fiktooriya ee F-10, waa manhajka Ingiriiska wuxuuna leeyahay laba jaho oo ah waxbarasho: iyo Ingiriis oo ah luqad labaad oo siyaado ah (EAL).

EAL waa ardayda kaga hadasha guriga luqad kale una baahan inay bartaan English si ay ugu guulaystaan Dugsiga. EAL-ka, ardadu waxay bartaan wixii ku saabsan Ingiriiska, isticmaalana Ingiriis si ay u bartaan wuxuu yahay iyo mawduucyada lagaga hadlay dhinacyada kale ee Waxbarasho. Waxay leeyihiin baahiya kala duwan oo waxbarasho ardada Ingiriiska kaga hadasha guriga luqadooda ahaan.

### Dhabooyinka Manhajka Ingiriis oo Luqad Labaad ah (English as an Additional Language - EAL)

Manhajka EAL wuxuu qeexaa saddex jaho ama dhabo oo barashada barayayaasha EAL, oo la xiriirta da'dooda iyo heer sanad kooda

- Dhabada A (Pathway A) ee ardada Asaaska ilaa Sanada 2aad
- Dhabada B (Pathway B) ee ardada sanadaha 2aad ilaa 8aad
- Dhabada C (Pathway C) ee ardada sanada 7aad ilaa 10aad.

Dhabooyinkan mid kasta oo ka mid ah ayaa sharxa waxa ardadu samayn karaan heerarka kala duwan, sida 'Raacista awaamiir sahlan oo qoran iyo su'aallo. Ardadu mudadaas iyo inta u dhexaysa horay ayay maraan iyo dhabooyinkan markay baranayaan Luqada Ingiriiska.

### Ilaa intee ayay qaadataa?

Ma jiraan wax go'an ama qadar loo baahan yahay oo waqti ah oo ay tahay in arday barto ama joojiyo inuu barto EAL (English as an Additional Language). Cilmi baaris ayaa muujisay inay qaadani karto inta u dhexaysa 5 iyo 7 sanadood, iyo mararka qaarkood ilaa 10 sanadood, ardaygu inuu barto luqada wax lagu baran karo ee uu uga baahan yahay dugsiya sarre. Waxaa jira arrima badan, sida da'da ardayga jiro markuu bilaabay inuu barto Ingiriis, taas ayaa go'aamin doonta haddii EAL ama English yahay xalka ugu fiican ardayga. Ardada waaweyn oo bilaabaya inay bartaan Ingiriis waxay u baahan doonaan waqti badan si uu u gaaro luqad heer akameemik ah sidii arday ku hadla Ingiriis luqad kowaad ahaan.

Barashada EAL waxay siisaa ardada asaas xoogan xagga Ingiriiska kaas oo caawimi doona inay ku guulaystaan dhamaan dhinacyada barashada. Marka ilmahaaga macalinkiiisu qiimeeyo in ilmahaagu diyaar u yahay inuu ka gudbo EAL una gudbo Ingiriis, waxay kaala hadli doonaan arrintan adiga. Wadajir ahaan waxaad go'aan ka gaari kartaan habka ugu fiican oo ilmahaagu ku sii wadi karo barashada Ingiriiska.

### Dhabooyinka mihnadaha (Career pathways)

Shahaadada reer Fiktooriya ee Waxbarashada (VCE) Naqshada Daraasada ardada sanadka 11aad iyo 12aad ayaa iyaguna bixiya labadaba EAL iyo English. Ardada dhamaysa VCE EAL ayaa leh isku fursado lagu aado jaamacad Australia ama lagu doorto daraasa kale ama dhaba mihnadeed sida kuwa dhameeyey VCE English.

## Warbixinta Ardada EAL

Bisha Juun iyo Diseembar sanad walba, waxaad heli doontaa warbixino ku saabsan horumarka ilmahaaga oo ay la socoto dhabada minhajka. Warbixinta EAL waxaa ku jirta qiimaynta saddex nooc oo luqada ah: ku hadalka iyo dhegaysiga, akhrinta iyo daawashada, iyo qoritaanka. Habkaan wuxuu la mid yahay warbixin Ingiriis ah oo kale. Warbixintu waxaa laga yaabaa inay bixiso macluumaad siyaada ah, tusaale ahaan, wixii ku saabsan ilmahaaga wuxuu samaynayo iyo meelaha ay uga baahan yihiin caawima siyaada ah.